*Dhibbanayaasha dembiga xaq ayay u leeyihiin in ay ka qaybqaatan iyo in laga dhegaysto nidaamka garsoorka dembiyada ayaga oo ka warbixinaya raadka uu dembiga ku reebay. Warbixinta raadka u dembiga ku reebay dhibbanaha waxa ay dhibbanaha siinayaan fursad ay kaga hadlaan marka u dhacayo xukunka ama dhegaysiga qof dhallinyar go'aan looga arrinsanayo raadka uu ku reebay dembiga ayaga iyo reerahooda. Ka qayb qaadashada dacwadda waxa ay dhibbanayaasha ka caawin kartaa soo kabashadooda xagga qiirada.*

## Dhibbanaha Moogashadiisa

Warbixinta raad ku reebidda dembiga ee dhibaanaha waxa dhici karta in ay noqoto fursadda kaliya ee dhibbanahu uu garsooraha ugu sheeego waxa ka soo gaaray dembiga.

Ayadoo uu kiiska hadba heer laga marayo nidaamka garsoorka dembiyada, dhibbanayaasha waxa ay haystaan fursado yar oo ay ugu sheegaan garsoorayaasha iyo dadka kale ee saamaynta uu dembiga ayaga ku yeeshay. Marka uu xukunka dhacayo ama qof dhallin yar laga arrinsanayo, si kasta ha ahaatee, dhibbanayaasha waxay dhabarka u dhiganayaan qaasaraha shaqsiyeed iyo midda dhaqaale ee uu dembiga u geestay iyo in ay fikrad ka dhiibtaan dembiilaha xukunkiisa ama kiiska laga arrinsanayo.

## Yaa ka warbixin kara raadka uu dembiga reebay?

Dhibbanaha dembiga xaq ayuuu u leeyaay in uu maxkamadda horkeeno raadka uu dembiga ku reebay waqtiga dhegaysiga xukunka uu dhacayo ama qof dhallinyar laga arrinsanayo. Dhibbanaha dembiga waxaa lagu tilmaami karaa in uu yahay qof ay qasaaro ama dhaawac ka soo gaaray wax uu dembiga sababay. Dhibbanayaasha waxaa ka mid noqon kara xubanaha reerka, ilaalada, ama xafide kale ee qof yar, qof aan isbixin karin, qof naafoobay, ama qof dhintay.

Maxkamaddu waxa ay khiyaar u leedahay in ay so dhowayso dad kale ee dhibbnaha ka soo jeeda in ay xitaa ka hadlaan raadka uu dembiga reebay. Haddii xubanaha kale ee reerka ama saaxiibbadada ay doorbidaan in ay waddadan maraan, waa in waqti hore lala soo xariiro xeerilaaliyaha xafiiskiisa si loo wajaho aymiyado ama la xaddidaad kasta ee maxkamaddu soo rogto.

Jaalliyadahu waxa ay xaq u leeyihiin in ay maxkmadda horkeenaan warbixin hadala ama mid qoraala ee raad ku reebidda dembiga marka uu dembiga saamayn ku yeeshay.

Warbixintan waa in ay sharaxdo dhibka bulsho ama dhaqaale ee uu dembiga u gestay degganayaasha iyo ganacsatada ka hawlgala jaaliyaadda oo ah halka uu falka dembiga ka dhacay.

Dembiilayaasha xaq ayay u leeyihin in warbixin ka dhiibtaan waqtiga dhegaysiga xukunka uu dhacayo ama qof dhallin yar laga arrinsanayo iyo in dad kale ayaga u hadlaan. Warbixinnada ay dembiilayaasha ama dad kale dhiibayaan waa in ay ahaadaan kuwo ku koobaan arrimo ku saabsan waxa dhabta ah ee xukunka iyo aysan la soocon faallooyin gaara ee ku saabsan dhibbanaha ama dhibbanaha taageerayaashiisa.

## Inta Dacwadda lagu Jiro

Xafiiska xeerilaaliyaha, ama mararka qaarkood, sarkaalka siidaynta shuruudda ama sarkaalka asluubta , waxa uu dhibbanaha u sheegyaa taariiqda, waqtiga, iyo goobta uu xukunka ka dhacayo ama qof dhallin yar laga arrinasanayo. Hawlaha maxkamadda waxa dhici karta in qabashadooda had iyo jeer la bad-baddalo, marka dhibbanayaasha waxaa laga rabaa in ay la xariiraan xeerilaaliyaha ama kaaliyaha maxkamadda maalinka ka horreeya maalinka dhegaysiga la qabanayo si loo hubiyo in dhageysigu dhaacayo.

Maalinka uu dhegaysiga dhacayo, dhibbanayasha waa in ay daqiiqado yar ka soo hormaraan si ay u tagaan qolka saxda ee dacwaddu ka dhacayso. Waa caadi in daqiiqado yar kahor la baddalo halka dacwadda lagu qabanayo.

Kaddib marka ay soo xaadiraan, dhibbanayashu waa in u tagaan kaaaliyaha iyo xitaa xeerilaaliyaha ama u doodadha dhibbanaha iyo in ay rabaan in meesha ay ka sheegaan raadka uu dembiga ku reebay inta aan dembiilaha la xakumin.

Raadka uu demibiga ku reebay waxaa kaloo la horkeeni karaa maxmadda asaga oo hadal ama qoraala, taaso ku xiran sida uu dhibbanaha rabo. Dhibbanayaasha aan doonayn in maxkmadda ay horyimaadaan hasayeeshe doonaya in meesha ay ka sheegaan raad ku reebiddooda dembiga waxa ay xeerilaaliyaha ama u doodaha dhibbanaha ka codsan karaan in qoraalkooda ayagu meesh ay ka aqriyaan.

Marka maxkamadda ay wax jeedinayso, dhibbanayaasha waa in uu hadalkooda noqdaa mid garsooraha u jeeda, ee uusan u dembiilaha u socon. Waxaa kaloo laga doonayaa in ay xasuustaan in ay codkooda kor u qaadan iyo si cad u hadlaan si garsooraha iyo weriyaha maxkamadda ay si fiican u maqlaan raadka uu dembiga ku reebay dhibbanaha.

Waa ay fududdahay in qofka ay qiiro gasho marka uu ka hadlayo raadka uu dembiga ku reebay, taasina ay sababi karto in dhibbanayaasha qaarkood aysan awoodin in ay hadalkooda dhammaystiraan. Dhibbanayaasha waxaa lagula talinayaa in ay la yimaadaan qorshe baddala midkii hore haddii arrimo sidaas oo kale ay dhacaan si markaas xeerilaaliyaha ama u doodaha ay diyaar u ahaadan in warbixinta ay dhammaystiraan haddii taa loo baahdo.

Garsoorayaasha waxa ay masuul ka yihiin in ay dhowraan sharafta iyo kala dambaynta maxkmadda. In kastoo la soo hadalqaadayo arrimo qiiro xooggan soo jiidanaya marka raad reebidda laga hadlayo, garsooraha ayaa soo dhexgali dooono haddii meesha laga sheego ereyo handadaad ah, aflagaaddo ah, ama baaqyo aan loo baahnayn.

## Xaddidaadyada Raadka Dembiga uu ku Reebay Dhibbanaha

Garsooruhu waxa uu xaddidaad macquul ah ku soo rogi karaa waqtiga, dhererka, iyo qaabka dhibbanaha uga hadlayo raadka uu dembiga ku reebay. Dhibbanayaasha waa in ay xasuustaan in warbixin dherar badan aysan wax macna badan u kordhinayn. Runtii, warbixinta raad reebidda dembiga ee dhibbanaha oo ah mid cad, kooban, iyo ay ka reeban yihiin ereyo soo noq-noqda ay ahaanayaan kuwo ay dhegaystayaasha si fiican u soo dhoweynayaan.

Maxkamadaha qaarkood waxa ay raad reebidda dhibbanaha u oggolaan doonaan in lagu horkeeno qaab duwan, sida sawirro ama fiidiyo ay muusiko la socoto. Tani waxa ay dhici kartaa marka dhibanuhu uu dhinto ama lagu mujinayo sida uu ahaa dhibbanaha wixii dambiga ka horreyay iyo sida uu dembiga u baddalay. Waxaa sii dheer, warbixinta ay dhiibtaan caruur yar-yar oo dhici karta in la mariyo waddo ka duwan, taaso ku habboon qaabka iyo dadka. Waxaa muhiim ah in xeerilaaliyaha xafiiskiisa lala tashado kahor inta aan la gaarin waqtiga uu xukunka dhacayo haddii meesha booska warbixinta hadalka ama midda qoraalka raad reebidda dembiga wax kale la soo galinayo. Qawaaninta maxkmadda iyo ahmiyadda waqtiga waxa ay saamayn ku yeelan doonaan waxa maxkmadda la horkeenay inta uu dhegaysiga socdo.

## Maxaa la soo raacin warbixinta raadka dembiga uu ku reebay dhibbanaha?

**Warbixinta raadka dembiga uu ku reebay dhibbanaha waxaa ka mid noqon kara:**

- Warbixin kooban ee ka hadlaysa dhawaca jirka iyo midka qiirada dhibbanaha kasoo gaaray dembiga loo gestay iyo wax kasta ee loo isticmaalay daawo/ilko hagaajinta, haddii waxakani ay yihiin kuwo hal mar ama kuwo weli socda.
- Warbixin kooban ee ka hadlaysa qasaaraha dhaqaale iyo hanti la burburiya ee dhibbanaha ka soo gaaray dembiga loo gestay, ay ka mid yihiin mushaarka lagu waayay sababo la xariira shaqo ama shaqo la wadi waayay, iyo codsashada qaan-celinta qarashka uu dhibbnaha jeebkiisa ka bixiyaay.
- Ficilka ama diidmada dhibbnaha ee la xariirta xukunka la soo jeediyaay ama qofka dhallinta looga arrinsanayo, ay ka mid yihiin xabsiga/muddada xabsi lagu haynayo, hawalaha xukunka xabsi baddalidda, ahmiyadda la fasaxo waqtiga shaqada, fursadaha loo helayo in jaaliyadda wax loo qabto, barnaamiyada daawaynta, iyo/ama shuruudaha siidaynta xarigga.
- Warbixinta naatiijada uu dhibbanaha filayay iyo sababta.
- Ahmiyad saariida dhibbanaha, ay ka mid yihiin waxqabyadii hore ee dhibbanaha, waxa uu mustaqbalka ka filayay, iyo sida uu dembiga raad ugu reebay hawlahan.
- Isbaddallada xagga nolosha, sida awoodda loo leyahay in la shaqaysto, gaari la wado, ama lagu qasbo in meel kale loo guuro.
- Saamaynta ka imaanaysa geerida deg-degga ah ee xubin reerka ka tirsan, sida rajo la waayay, hawo, gacalo, wehelnimo, iyo isku hallayntii dhinaca dhaqaalaha.
- Gebiahaamba saamaynta uu falka dembiga ku reebay dhibbanaha iyo reerkeeda/reerkiisa.

Warbixinta raad reebidda dhibbanaha waa in aanay ay ku jirin ereyo lagu aflagadeynayo ah ama lagu handadaadayo dembiilaha ama shaqaalaha maxkmadda.

Dhibbanayasha ay dhibaato ka haysato soo diyaarinta warbixintooda raad reebidda dembiga waa in ay caawimad weydiistaan xafiiska xeerilaaliyaha, u doodaha, ama qof ay ku kalsoon yihiin.

## Soo diyaarinta warbixinta raad ku reebidda dembiga ee dhibbanaha

Warbixinta raadka uu dembiga ku reebay dhibbanaha waxa ay noqon kartaa warqd ama foom gacan lagu soo qoray ama la teebgareeyay. Xeerilaaliayaha xafiiskiisa ayaa caadi ahaan dhibbanaha u dirya foomka warbixinta raadka uu dembiga ku reebay dhibbanaha marka dacwadda la bilaabayo. Mararka qaarkood, foomka iyo macluumaadka ku saabsan xukunka ama qof dhallin yar looga arrinsanayo waxaa loo diri doona goor dambe ee kiiska lagu jiro saarkaalka siidaynta shuruudda ama sarkaalka asluubta jaalliyada.

Waxaa muhiim ah in warbixinta la dhammaystiro, koobi gaara laga samaysto, iyo xeerilaaliyaha loogu celiyo sida ugu dhaqsiyo badan. Tan waxaaba run ka sii dhigaya marka ay jiraan kiisaska dembiyada dhexe, kuwaaso muddo gaaban lagu soo afjari karo. Dhibbanayaasha waxaa ay markasta saxi karaan weedhaha amaba ay goor dambe dalbadaan in ay horkeenista warbixinta ka tanasuleen.

*Fursadaha lagu bixinayo warbixinta raadka uu dembiga ku reebay dhibbanaha waa xuquuq aasaasi ee uu leeyahay dhibbanaha dembiga.*

### Nalaga Soo Xiriir

Office of Justice Programs
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

Iimayl: dps.justiceprograms@state.mn.us

Shabakadda internetka: dps.mn.gov/divisions/ojp

651-201-7300 Telefoonka Guud

888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta

651-205-4827 Khadka Dadga Maqalka Culus (TTY)

651-296-5787 Fakis

6/11

Victim Impact Statement - Somali

# Warbixinnada Raadka uu Dembiga ku Reebay Dhibbanaha



Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda
Waaxda Ammaanka Guud ee Minnesota

Office of Justice Programs
Minnesota Department of Public Safety